

Bates

April 23, 2023

Asxaabta Qaaliga ah,

[Sidaan toddobaadkii hore idiin sheegnay](#), waan ku faraxsanahay inaan daahfurno barnaamijka kaqeybgelinta shaqaalaha ee dhammaystiran ee ku bilaaban doona kulamada talo-bixinta ee dhici doona labada toddobaad ee soo socda. Kulamadani ayaa na wada siin doona fursado loo wada dhan yahay si aan u wadaagno waxa maskaxdeena ka guuxaya si aan si fiican ugu fahamno habdhaqamadeena iyo siyaasadaheena hadda jira ee kor u qaada kaqeybgelinta iyo waxa ay tahay inaan qabano. Talooyinka laga helo kulamada waa la uruurin doonaa, la lafa guri doonaa, waxaana lala wadaagi doonaa shaqaalaha.

Si loo hubiyo tirada kulamada inay qof walba u saamaxayaan inuu ka qeyb qaato oo fikrado ku wadaago, waxaanu kaa codsan doonaa inaad iska diiwaangeliso kulanka aad rabto inaad ka qeybgasho. Haddii kulamo dheeraad ah loo baahdo, taariikho iyo waqtiyo dheeraad ah ayaa la heli doonaa.

[Halkan iska diiwaangeli si aad uga qeyb gasho kulanka talo-bixinta](#)

Kulamadani waajib maaha, laakiin si adag ayaa loo dhiiragelinayaa. Si dadaalkani u noqdo mid loo dhan yahay oo guulaysta, waxaa muhiim ah in aynu maqalno fikradaha shaqaalaha ugu badan ee suurto galka ah. Kaqaybgalka kulanka talo-bixinta wuxuu kuu oggolaanaya inaad wadaagto fikradahaaga oo aad maqashid fikradaha asxaabtaada. Si kastaba ha noqotee, haddii aysan suurtagal ahayn inaad ka qeyb gasho, waxaad haysataa fursad aad talo ku bixiso adoo u maraya [foomkan onlaynka ah](#). Su'aalaha ku qoran foomkan waxay la mid yihiin kuwa la soo bandhigi doono inta lagu gudajiro kulamada talo-bixinta ee fool-ka-foolka ah iyo kulamada Zoom-ka ee talo-bixinta.

Haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay kaalmo isdiiwaangelin, fadlan kala xiriir Nora Molloy (nmolloy@bates.edu) ama Waaxda Kheyraadka Shaqaalaha (hrdept@bates.edu).

Si horudhac ah ayaan kuugu mahadnaqayaa! Waxaan rajayneynaa inaan kula xiriirno innagoo u marayna dadaalkan muhiimka ah.

Daacadnimo,

Hope

Hope Burnell

Assistant Vice President of Human Resources & Environmental Health and Safety
215 College Street | Lewiston, ME 04240 | **Phone:** (207) 786-8388